

Tababarka Xalalka waara oo loogu talagay Bulshooyinka uu Saameyey Barakaca ee Somalia

Koorsada 2aad. Kulanka 2aad:Qaadashada qaab hawleedyo badan iyo Daneeyayaal badan

Faalo Kooban

Qorshaynta aagga ku saleysan waxay u baahan tahay habab dhinacyo badan iyo daneeyayaal badan leh oo u baahan in la koobo dhammaan hawlwadeennada ku habboon si wax looga qabto baahiyo ballaaran. Waxa kale oo ay u baahan tahay farsamooyin isuduwid firfircoon oo lagu dhiso is-dhameystirka iyo faa'iidooyinka isbarbardhiga ee dhammaan ururada hawlwadeenada ku lugta leh. Qaybtani waxay noqon doontaa fursad aad ugu wanaagsan oo lagu bilaabi karo tiro koobka daneeyayaasha iyo barnaamijyada jira iyo hanaanada isuduwida oo gacan ka geysan karta in loo helo xalal waara bulshooyinka uu saameyey barakaca ee aagga la xushay. Laakiin xalalka waara ayaa ka sarreeya dhammaan mas'uuliyadaha mas'uuliyiinta qaranka sidoo kale kulanka waa munaasabad lagu bilaabayo ka wada-xaajoodka siyaabo lagu xoojiyo awoodaha hay'adaha qaranka iyo kuwa maxalliga ah si ay u hoggaamiyaan iskuna duwaan geeddi-socodkaas loo dhan yahay isla markaana laga dhigo mid waara. Qeybta ugu dambeysa ee kulanka waxaa loogu talagalay soo bandhigida farsamooyinka isuduwidda ee ka jira heerka qaran ee Soomaaliya.

Ujeedooyinka

Dhamaadka kulanka, ka qaybgalayaashu waxay awoodi doonaan inay:

- Sharaxdo muhiimadda ay leedahay ka-qayb-galka qaybo badan iyo ururo ee qorshaynta, habeynta barnaamijyada, iyo hirgelinta xalalka waara.
- Tirokoobto ururada hawlwadeenada ay tahay inay kaqaybqaataan geeddi-socodka xalalka waara oo go'aamiya doorkooda
- Baarto isuduwidda iyo farsamooyinka iskuduwida si loo hubiyo barnaamijyada xalalka waara oo isku-dhafan oo dhinacyada kala duwan iyo daneeyayaasha badan yeesho.

Fariimaha Muhimka ah

1. **Ururo fara badan oo ka kala socda saktarada kala duwan ayaa loo baahan yahay si wax looga qabto baahiyaha badan ee Bulshooyinka ay Barakacyadu saameyeen ee ku nool aagagga la xushay iyo kuwa xaddidan**

2. **Ururadani waa inay ka tarjumaan dabciga bani'aadamnimada, horumarka iyo dhismaha nabadda ee xalalka waara. Bulshooyinka ay saameyeen barakacyadu waa in sidoo kale loo tixgeliyaa inay yihiin hawlwadaneeda muhiimka ah ee horumarkooda ku wajahan xalka waara.**
3. **Farsamooyinka isku-duwidda ayaa loo baahan yahay in la sameeyo si loo hubiyo in si hufan loo socodsiiyo macluumaadka, qorsheynta joogtada ah iyo ka falcelinta ku saleysan falanqaynta wadajirka ah iyo ujeeddooyinka guud.**
4. **Mas'uuliyiinta qaranka iyo kuwa maxalliga ah ee Soomaaliya waxay abuureen hanaan isuduwid oo heer qaran iyo heer degmo ah si loo hubiyo iyo qulqulka isku duuban qorshayaasha xalka waara.**

Xusuusnow in qoraalada fududeynta iyo talooyinka, iyo sidoo kale fariimaha muhiimka ah, lagu diyaariyey bogag kasta oo ku yaal sanduuqyada qoraalka.

Habka Gudbinta

Qaabdhismeedka

Jimicsi yaroo Xiiso leh

Yaa hogaaminaya? Weydii ka qaybgalayaasha midkood inuu ka baxo qolka oo uu kuwa kale amar ku siiyo inay u istaagaan qaab goobo ballaaran ah. Weydii mid ka mid ah inuu ciyaaro doorka "hogaamiyaha aamusan" ee inta kale ee kaqeybgalayaashu ay si xikmad leh ugu dayan doonaan marka kaqeybgalaha ku sugaya banaanka qolka loo ogolaado inuu soo galo. Hadafka ugu weyn ee ciyaarta ayaa noqon doonta in kaqaybgalahan soo saaro kuma hogaaminaya. Si aad hawsha uga dhigto mid fudud oo aad u xiiso badan, weydii hoggaamiyaha inuu noqdo mid aad u firfircoon: sida inuu sacbiyo, madaxa ruxo, cagaha xooa dhulka ku yara garaaco, iwm. Laakiin uusan / dhaq-dhaqaaqyadiisu badelin.

Kadib casharkaan wuxuu u qaybsan yahay sadex qaybood, qayb kamida tan labaad waa ikhtiyaari iyadoo kuxiran hadafyada dadka la beegsaday iyo ujeedooyinka tababarka:

1. **Qaybtani inta badan waxay u heellan tahay fahanka waxa aan uga jeedno hannaanka daneeyayaasha badan/ saktarada badan,** sababta ay muhiim u tahay iyo sida looga dhigayo mid suurtagal ah iyadoo loo marayo hanaan 5-tallaabo ah. Kulankaan waxaan kaliya diirada saari doonaa aqoonsiga saktarada ku haboon. Qaybtan kulanka waxaa calaamadeyn doona tirokoobka iyo falanqaynta ugu horeeya ee ururada iyadoo la adeegsanayo faa'iidooyinka isbarbardhiga ee degmada / deegaanka. Dood Ikhtiyaari ah oo ku saabsan caqabadaha uu leeyahay hanaanka saktarada badan iyo sida wax looga qabto ayaa la soo jeedinayaa dhammaadka qaybtaan
2. **Waa maxay isku-duwidda, maxay muhiim u tahay iyo sida la isugu duwo?** Qaybtani waxay ku bilaabmaysaa dood ku saabsan muhiimadda isku-duwidda iyo farsamooyinka isuduwidda xalalka waara maadaama ay ku lug leeyihiin ururo iyo saktaro badan oo kala duwan. Hawsha qaybtani lagu soo bandhigay waa ikhtiyaari waxayna kuxirantahay dhagaystayaasha la beegsadanayo iyo

ujeedooyinka tababarka. Asal ahaan waxay ku saleysan tahay natiijooyinka ka soo baxay tirokoobkii ururada ee hore. Hawshan waa tirokoob hanaanada isuduwidda ee hadda jira iyo barnaamijyada si loo aqoonsado nusqaamaha iyo fursadaha suurtagalka ah ee isuduwida qorshaha ku saleysan aagga ee aagga / degmada / xaaladda deegaanka xaddidan. Ma abuurnaa nidaam iskuduwid cusub? Ma adeegsanaa, xoojinaa, la qabsanaa mid jira? Kuma ka maqan hababka jira oo ay tahay in lagu daro? Maxaa shaqeynaya? Maxaan shaqeynin? Sidee loo hagaajiyaa isuduwidda si looga dhigo qorshaha xalka ku saleysan aagga mid loo dhan yahay, daneeyayaal badan iyo saktaro badan?

3. **LahaanshO Qaran:** Mas'uuliyiinta qaranku waxay mas'uul ka yihiin hubinta guusha horumarka ah ee xalalka bulshooyinka uu saameyey barakaca iyadoo taageero laga helayo ururada qaranka iyo kuwa caalamiga ah iyo ka qaybgalka firfircoon ee bulshooyinka uu saameyey barakaca laftooda. Sida loo xoojiyo awoodaha ururada qaranka iyo kuwa maxalliga ah si ay u hogaamiyaan iskuna duwaan qorshaynta iyo hirgalinta ku saleysan aagga deeganka oo la hubiyo sii jiritaankeeda? Muxuu noqonayaa doorka ururada kala duwan ee la tirokoobay bilowga kulanka si loo hubiyo lahaanshaha noocaas ah iyo sii jiritaankeeda?

Waa kuwan qaababka isuduwidda ee jira oo kooban ee lagu xusay soo bandhigida:

Madal wadajir ah oo loogu talagalay iskuduwida xalalka waara oo lala yeesho dowladda Soomaaliya iyo beesha caalamka – Kooxda tiirarka hawlaha adkaysiga iyo koox-hoosaadyada ka shaqeeya socdaalka, barakaca iyo xalalka waara (MDDS) ee hoos yimaada Xarunta Horumarinta iyo Dib-u-dhiska Soomaaliya (SDRF), ee hubinaya iswaafajinta lacagaha iyo barnaamijyada ayaga iyo NDP. Kooxdu oo la ansixiyey Febraayo 2019 mabaadi'da guud ee kaqeybgalka Barnaamijyada Wadajirka ah ee Xalalka waara

Xoghaynta Xalalka waara oo ka kooban 14 hay'adood oo dawladeed oo ay isu-duway ka tahay Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOPEID) iyadoo hadda ay ka socdaan hawlo isdaba-joog ah oo heer gobol ah.

Unugyada xalalka waara ee degmooyinka muhiimka ah ka jira koonfur Galbeed iyo gobalka Banadir.

Sidoo kale waxaa xusid mudan dadaalada ay hada wado dowlada ee ku aadan dib u dejinta magaalada Baydhabo, oo uu hogaaminayo wasiirka maareynta masiibooyinka iyo arimaha bini aadanimada Koonfur Galbeed iyo sidoo kale Duqa magaalada Baydhabo.

Kooxda Ka Shaqaynta Hawlaha Xalalka waara oo ay dhiseen hay'adaha UN-ka iyo NGO-yada si loo hagaajiyo is-dhameystirka, waxtarka iyo isla xisaabtanka wadajirka ah ee waxqabadyada, oo qayb ka ah shaqadii ay qabteen Kooxda Maareynta Barnaamijka ee Qaramada Midoobay iyo Kooxda Isu-duwidda Kooxaha.

Wakhtiga

Kulankaan waxaa loo qorsheeyay inuu socdo hal saac iyo badh ilaa laba saacadood iyadoo kuxiran inaad socodsiinayso howlaha isuduwidda

- Qiyaastii 40 daqiiqo qaybta hore oo ay ku jiraan tirokoobka iyo falanqaynta ururada
- 20 illaa 45 daqiiqo qeybta labaad waxay kuxirantahay inaad socodsiiso howlaha isuduwidda
- 20 daqiiqo oo qeybta ugu dambeysa ah

Hawlaha

I. Waxqabadyada saktarada iyo daneeyayaalka badan.

1. **Hawsha 1aad: Kuma ku jira?**
   Tallaabada 1aad. Tirokoobka Ururada: Iyadoo ku saleysan aag cayiman oo la xushay / degmo ama duruuf maxalli ah, weydii ka-qaybgalayaasha inay tiokoobaan dhammaan ururada/qaybaha jooga aaggan kuwaasoo oo ay tahay inay qayb ka noqdaan geedi socodka qorshaynta xalka iyo hirgelintiisa.

- U qoondee koox kasta hal ama laba qaybood oo ka mid ah ururada iyo midab ku saleysan xalaada guud ee deegaanka. Waxay noqon kartaa, tusaale ahaan, midab buluug ah oo loogu talagalay ururada bani'aadamnimada, midabka cagaaran ee ururada horumarka, casaan loogu talagalay ganacsiga gaarka loo leeyahay (ururada shaqaalaha, bangiyada, beeraleyda, hoggaamiyeyaasha ganacsatada iwm), huruudna u noqdo mas'uuliyiinta qaranka ama kuwa maxalliga ah, bulshada iyo ururada bulshada rayidka ah, buluug loogu talagalay akadeemiyada.
- Weydii inay liis gareeyaan oo ay ugu qoraan waraaqaha midabbada ku u dhigma leh illaa 15 daqiiqo, hal urur warqaddiiba. Kadib waxay u soo jeedin doonaan ururadooda inta kale ee kaqeybgalayaasha waxayna ku dhejin doonaan darbiga. Hubso inay waraaqaha sameynayaan goob oo dhexda ku leh qayb maran.

Tallaabada 2aad: Falanqaynta ururada (ikhtiyaar)

- Ka dib faahfaahinta koowaad soo saar su'aasha ku saabsan faa'iidooyinka isbarbardhigga shaashadda (horey loo geliyay) oo ku celi xaqiiqda ah in dhammaan ururada, ee qaybaha kala duwan, ay ku lug yeelan doonaan qorshaynta, hirgelinta iyo kormeerka ku saleysan faa'iidooyinka isbarbardhiga
- Waa maxay macnaheedu, maxayna uga dhigan tahay dhabta guud ee deegaanka ka jirta oo ah halka laga abaabulay tababarka? Fiiri bogagga soo socda.
- Weydii ka qaybgalayaasha in ay ka soo xushaan saddexn urur liistadooda ugu horreyey oo ay bilaabaan fulinta falanqaynta ururada si ay u qiimeeyaan faa'iidooyinkooda isbarbar dhigga qaab waafaqsan jadwalka shaxda ee la siiyay (jadwalka falanqaynta ururada hawlwadeenada).

II. Isuduwidda iyoNidaamyada isuduwidda

2. **Hawsha 2aad: Hababka isuduwidda ee jira: nusqaamaha iyo fursadaha. (ikhtiyaar)** Layligani waxaa lagu talinayaa in la raaco marka ujeeddooyinka tababarka tahay in loo diyaariyo qorshe xalka waara oo ku salaysan aagga.

   Tallaabada koowaad: Tiro Koobka Maxay yihiin nidaamyada isuduwidda ee hadda jira ama barnaamijyada ee ay ku lug leyihiin ururada horay loogu taxay aagga juqraafi ahaaneed la qeexay?
   - Weydii koox kasta in ay liis garayso hababka isku-duwida ee jira ama barnaamijyada ee ay ku lug leyihiin ururada horay loo taxay iyo inay warqad cad ku qoraan magacyada iyo gudoomiyahooda iyo ku xigeenka hal barnaamij / farsamo warqad kasta.
   - Ka dib, weydii inay ku taxaan xubnahooda waraaqo midabbo leh iyagoo isticmaalaya isla nidaamka midabka loo dejiyey lambarka ee layligii hore.

   - Is-xog wareysiga qiimeynta ah: weydii koox inay soo bandhigaan natiijooyinkooda oo ay ku dhajiyaan magacyada nidaamyada isku xidhka isu-duwida / magacyada barnaamijyada iyo xubnahooda gidaarada. Weydii kooxda kale inay dhammaystiraan, shaxda wax ka beddelaan.

   Tallaabada labaad: falanqaynta:
   - Weydii ka qaybgalayaasha midabka maqan iyo midabka aad ugu badan jadwalka shaxda. Tani waxay noqon kartaa farqiga/nusqaamka/ dulduleelo ugu horreeya ee la aqoonsaday.
   - Weydii ka qaybgalayaasha inay u muuqato dulduleelo kale oo dhici kara. Tusaale ahaan, midkoodna hanaanada farsamooyinka isuduwidda kuma jiraan dhammaan ururada horay loo taxay ama haddii ay ku jiraan xitaa, runti ma shaqeynayaan, hoggaanku waxtar ma lahan ama qaar ka mid ah xubnahoodu ma firfircoona, kuma lug laha ama si wax ku ool ah ugama qaybqaataan hawlaha hanaanka jira.

   Talaabada saddexaad: waa maxay fursadaha?
   - Maxay yihiin farsamooyinka isuduwidda ee hadda jira ama barnaamijyada loo isticmaali karo / la xoojin karo / la taaba gelin karo si loo taageero horumarinta qorshaheena xalka ku saleysan aagga deegaanka?
   - Doorkoodu muxuu noqon karaa? Fursado noocee ah ayey kooxdani bixisaa?
   - Ma waxaan u baahanahay inaan abuurno madal / koox cusub?
   - Waa kuwee ururada ka maqan kooxahan oo ay tahay in lagu soo daro madasheena / isku-duwidda xalka ku saleysan aagga deeganka.

Diyaarin

☐ Kala hadal qabanqaabiyaasha iyo la-hawlgalayaashaada hawlaha aad isleedahay waa ku habboon yihiin in lagu qabto xaaladaha u gaarka ah deegaanka ee tababarka.

- ☐ Diyaari waraaqo caddaan iyo kuwo midabbo leh oo u dhigma lambarka midabka loo dejiyey hawsha 1 iyo 2
- ☐ Hubso inaad gacanta ku haysato koolada ka sameysan bac qafiidta ama tan buluugga ah si aad darbiga ugu dhajiso magaca ururada iyo waraaqaha koobaya iskuduwidda
- ☐ Hubso inaad haysato meel kugu filan oo gidaarka ah si aad ugu dhajiso tirokoobka ururada iyo tirokoobka hanaanada iskuduwaha.
- ☐ Daabac shaxda falanqaynta ururada. Hal shax kaqeybgale kasta.

Maqaalo Qoraal ah oo Faaido leh

- ☐ Area-based approaches in urban settings, compendium of Case studies, May 2019 edition, Urban Settlement Working Group, Global Shelter Cluster.
- ☐ Area-based approaches: what does this mean in practice? Draft ReDSS brief
- ☐ Settlements Approach Guidance Note, where boundaries and action merge, Urban Settlements Working Group, Dec. 2020
- ☐ Lessons learned from three EU RE-INTEG Consortia (EIDACS, JSC, SDSC), ReDSS, Oct 2019
- ☐ Multi stakeholder approach to address urban displacement in Somalia, Mohamed Taruri, Laura Bennison, Shezane Kirubi and Aude Galli, FMR 63, Feb. 2020
- ☐ Advancing multi stakeholder engagement to sustain solutions, ReDSS briefing paper, Dec. 2019, accessible there: https://regionaldss.org/index.php/research-and-knowledge-management/redss-publications/
- ☐ ReDSS solutions framework webpage : https://regionaldss.org/index.php/research-and-knowledge-management/solutions-framework/
- ☐ Somalia Solutions Framework. Update 2019 Case Studies on Lesson Learnt and Practices to Support (Re)Integration Programming – Mogadishu, Baidoa, Kismayo, ReDSS.